



Office for the Coordination of Humanitarian Affairs

Deeq Bixiyayaasha arimaha Baniaadamnimo oo bixiyay US\$18.7 malyan si looga jawaabo fataahaadaha Soomaaliya

Muqdisho, 14-ka Noofembar 2019: Lacago isku darkoodu ay gaarayaan \$18.7 malyan ayaa laga bixiyay Xarunta Dhexe ee Deeqda Xaaladaha Baniaadamnimo ee degdegga ah (CERF) iyo keydka Deeqaha Arimaha Baniaadamnimo ee Soomaaliya (SHF) si loo kordhiyo taageerada la siinaayo in ka badan nus malyan qof oo ay saameeyeen fatahaada Soomaaliya.

“Lacagaahaan waxey yimaadeen xilli muhiim ah, iyadoo u suura geliyay iskaashatada arimaha baniaadamnimo iney sara u qaadaan gaargaarka lagu badbaadiyo dadka ay saameeyeen fataahaadaha,” ayuu yiri Adam Abdelmoula, Iskuduwaha Arimaha Baniaadamnimo ee Soomaaliya. “Waa muhiim in si degdeg ah aan u bixino taageerada la siiyo dadka ay musibadaan saameysay, laakiin waxaa sidoo kale u baahannahay inaan eegno wax walboon ka qaban karno xaaldaaha soo noqnoqday oo la xiriiro isbadalada cimilada.”

\$8-da malyan oo ka socota Xarunta Dhexe ee Deeqda Xaaladaha Baniaadamnimo ee degdegga ah (CERF) waxey Hay’adaha Qaramada Midoobey iyo iskaashatada kale u suura gelineysaa iney sii wadaan islamarkaan sara u qaadaan gargaarka ay ka bixiyaan goobaha ay fataahadu aad u saameysay ee gobolada Bay, Hiraan, iyo Shabeelada Dhexe iyadoo bixinaaya raashiin, gaarsiinta kooxaha gurmada degdegga ah iyo taageerada xarumaha caafimaad, bixinta gurmada aan cunada eheen iyo hoy deg deg ah, iyo sidoo kale adeegga biyaha, faya dhowrka iyo nadaafadda. Deeqaha CERF waxaa sidoo kale loo isticmaali doonaa Adeegyada Gurmada Cerka ee Qaramada Midoobey, taas oo gacan ka geysato alaabaha muhiimka ah iyo shaqaalah in loo qaado goobaha ay adagtahay in la gaaro fataahaadaha awadood.

\$10.7 malyan ee ka socota SHF waxey taageereysaa howlaha gargaarka baniaadamnimo ee dadka lagu badbaadiyo ee hay’adaha maxaliga ah iyo kuwa caamlamiga ah kuwaas oo ka howlgalo goobaha ay fataahaaduhu aad u saameeyeen iyadoo loo marinaayo qeybo gaar ah iyo kuwo isku dhaf ah islamarkaan la tixgelinaayo jawaabta gargaarka waaxda CERF. Waxaa intaas dheer, taageero deg deg ah oo xaga waxbarasahda ah, amniga xagga cunada, caafimaadka, nafaqada, hoy, biyo iyo faya dhowr. Lacagaha SHF waxey sidoo kale ka caawinayaan sara u qaadidda adeegyada lagu badbaadiyo dumarka, caruurta iyo kooxaha kale ee khatarta ku jira.

Deeqdii uugu dambaysay ee CERF waxey lacagahii CERF ee Soomaaliya gaarsiineysaa

\$50 malyan sanadka 2019, halka SHF – oo ay deeq ku bixiyaan wadamada Ostraliya, Kanada, Deenmaak, Jarmalka, Ayrlaandh, Korea, Hooland, Noorway, Sweden, Switzerland iyo Ingriiska – ay gaareysa \$51 malyan oo doolaar.

Roobab isugu jiro kuwa xoogan iyo kuwa dhexdhexaad ah oo bilowday bishii Oktoobar ayaa sababay fatahaado ka dhacay deegaanada dhulka hoose ee agagaarka webiyada Shabelle iyo Juba. Balat Weyne (Hiiraan), Baydhaba iyo Berdaale (Bay) iyo qeybo ka tirsan Shabeelada Dhexe ayaa ah goobaha ay fatahaadu aad u saameysay. Roobabka waxey burburiyeen dhismooyin, dhul beereed, iyo wadooyin waxeyna sidoo kale saameeyeen noolal maalmeedka dadka, iyadoo guryaha deegaana badan ay biyo fariisteen. Guud ahaan, qiyas ahaan 370,000 qof ayaa barakacay fatahaadaha awadood ilaa 5-tii Noofeembar 2019. [Khatarta nafaqa darada iyo faafitaanka cudurada sida malaariyada iyo shubanka weli wey ka jirtaa deegana badan oo fatahaadaha ay saameeyeen.](#)

Inkastoo la balaariyay taageerada, weli waxaa jira baahida xagga biyaha asaasiga ah, faya dhowrka, iyo adeegyada caafimaadka, taageerada cunada, iyo hoy deg deg ah. Qaramada Midoobey iyo iskaashatdeeda waxey ku qiyaasayaan in uugu yaraan lacag \$50 malyan oo dheeri ah si adeeg lagu badbaadiyo nafta loogu sameeyo dadka fataahadu saameysay. Sara u qaadidda howlaha noolal maalmeedka, iyo sidoo kale ka hortagga saameynta abaartrii uugu dambaysay ayaa loo baahan yahay in la joogteeyo si looga hortago hoos u dhaca amniga cuntada maadaama roobabka xoogan la filaayo iney sii da'aan bilaha Noofeembar iyo Diseembar.

Qoraal tafaatirayaasha loogu tala galay.

Keydka Deeqaha Soomaalia (SHF) iyo Xarunta Dhexe ee Deeqda Xaaladaha Baniadamnimo ee degdegga ah waxaa maamulo Xafiiska Qaramada Midoobey ee Iskuduwidda Arimaha Baniadamnimo ee (OCHA). Waxey deeq bixiyayaasha u ogoaanayaan iney isku soo uruuriyaan lacago lagu taageero howsha uugu sareysa ee arimaha baniadamnimo iyadoo laisku daraayo istraatiijyo jiheysan, deeqaha waxey hubinayaan in lacagaha lagu bixiyo wakhti iyo goobo loogu tala galay, waxeyna suura gelinayaan eyna xoojinayaan maareynta gargaarka. Si aad u heshid xog dheeri ah booqo bogga SHF www.unocha.org/somalia/shf ama kaal soco [@SHF_Somalia](https://twitter.com/SHFSomalia); Si aad u heshid xog dheeri ah oo ku sabsan CERF, fadlan booqo www.unocha.org/cerf ama kaal soco [@UNCERF](https://twitter.com/UNCERF). Si aad u heshid xog dheeri ah oo kus aabsan xaaladda guud booqo www.unocha.org/somalia

[follow on Twitter](#) | [friend on Facebook](#) | [Youtube](#) | [forward to a friend](#)

For further information, please contact:

Matija Kovac, SHF manager / Head, Humanitarian Financing, kovacm@un.org, Cell +254 732391043
Erich Opolot Ogoso, Head of Communications, ogoso@un.org, Tel. +252 616 548 007

This Press Release can also be downloaded from [here](#):

[unsubscribe from this list](#) | [update subscription preferences](#)

